7 shay oo ay tahay inaad ka ogaato talaalada COVID-19

The Vaccine Real Talk

Macluumaadka lambar 1

Talaalka COVID-19 lagama qaado COVID-19.

Talaalada COVID-19 malaha fayras nool, markaa ma keeno COVID-19. Talaallada COVID-19 waxa uu kaa ilaalinayaa fayraska. Waxa aad dareemi doontaa saamayn aafimaad daro ah marka lagu talaalo, sida gacanta oo ku bararta ama xumad.
Kuwani waa caadi oo waa caan.

Macluumaadka lambar 2

Talaalka COVID-19 waa amaan, waxaana lagu sameeyay daraasad sanado badan qaadatay.

Ma jirto talaabooyin laga booday markii la samaynayay talaalada COVID-19. Saynisyahanadu caalamka oo dhan ayaa ka shaqaynayay teknooloojiyada wax ka badan toban sano. Waxaana weeye sababta keentay in la sameeyo talaal amaan ah oo wax ku ool ah si dhakhso ah.

Macluumaadka lambar 3

Talaalka COVID-19 waxa uu kaa ilaalin karaa wax ka badan hal nooc oo fayras ah.

Fayraska uu is badalayaa, ama waxoogaa ayuu qaab kale noqdaa, mudo kadib. Macluumaadka laga hayo talaalka COVID-19 waxa uu sheegayaa in uu wax ka qabto ilaa iminka noocyada la arkay ee fayrasyada keena ah COVID-19.

Macluumaad lambar 4

Talaalada COVID-19 ma badalayaan DNA-gaaga.

Talaalada COVID-19 waxaa weeye talaalada mRNA oo ma dhax galo sinaba DNA-ga. Waxa ay keentay jawaabcelin difaaca jidhka ah oo abuurta antibodhi si looga ilaaliyo qofku inuu qaado COVID-19.

Macluumaadka lambar 5

Talaalada COVID-19 lalama xidhiidhin dhalmo la'aan ama ilmaha oo soo dhaca.

Ma jirto wax macluumaad ah oo muujinaya in talaalka COVID-19 uu keeno dhalmo la'aan ama in ilmaha uurka uu soo rido. Sidoo kale qaabka jidhku u samayn yahay ahaan macquul maaha in kor u kaca yar ee borotiinta korona fayras inay daloolin karto makaanka oo ay keeni karto dhiigid. Waa amaan in la qaato talaalka inta la leeyahay uurka ama la naasnuujinayo. Dumarka uurka leh waxay qabaan khatar badan oo ah inay qaadaan xanuun daran iyo in loo dhigo isbitaalka COVID-19. Kala hadal dhakhtarkaaga hadii aad qabto wax su'aalo ah.

Macluumaadka lambar 6

Talaalada COVID-19 ma wataan mikroojib ama aalad dadka meesha ay joogaan lagula socdo.

Macluumaadka ku saabsan talaalku COVID-19 inuu wato mikroojib ama aalad dadka lagu socdaa **waa been cad**. Waanu garanaynaa waxa ku jira talaal kasta. Liiska waxyaabaha uu ka samaysan yahay talaal kasta waxaa laga heli karaa onleynka.

Macluumaadka lambar 7

Dadka qaba xanuunada mudada dheer ah ama xaaladaha waa inay is talaalaan si dhakhso ah marka la gaadho wakhtigii la talaali lahaa.

Hadii aad qabto xanuun mudo dheer ah, sida macaanka, waxa aad khatar badan ugu jirtaa inaad qaado xanuun daran oo COVID-19 ah. Talaalada COVID-19 waa amaan oo wax ayay u taraan dadka qaba xanuunada mudada dheer ah.